



## **Wax dacwa ah ma qabtaa?**

Haddii aadan ku faraxsanayn sida ay kuula dhaqantay dawlada Fiktooriya, hay'ad dawladeed ama gole degmo, waxaad u dacwoon kartaa Ombudsman-ka Fiktooriya.

## **Waa maxaay Ombudsman?**

Ombudsman-ku wuxuu baaraa dacwooyinka lidka ku ah shaqaalaha waaxyaha dawlada, hay'adaha dawlaga ah iyo golayaasha degmada.

Ombudsman-ku wuxuu bixiyaa adeeg lacag la'aan ah, madaxbanaan, hal dhinacna ah.

Dhamaan baaritaanadu waa qarsoodi.

## **Maxaan uga dacwoon karaa Ombudsman-ka?**

Dacwooyinka noocaas ah oo uu qabto Ombudsman-ku waxay khuseeyaan go'aanada, falalka ama dabeecada shaqaalaha ay shaqaaleeyaan hay'adaha dawlada. Waxaa arrimahaas ku jiri kara, masalan:

- Dhibaatooyinka khuseeya arrimaha diimeed ee Xabsiyada
- Hantida ku lunta Xabsiyada
- Hay'adaha dawlada oo ku guuldaraysta codsiyada maxaabiista
- Waxyeelida jireed iyo af oo ay geystaan shaqaalaha xabsigu
- Si xun u dhaqmida macalimiinta, barayaasha jaamacada iyo kormeerayaasha
- Hababka iyo ficilada si xun u qiimaynta
- Habka isqorida
- Qiimayn la'aanta daraasa hore
- Dhibaatooyinka la xiriira iinta
- Arrimaha ku saabsan xaq u yeelashada ama dayactirida guryaha dadweynaha
- Arrimaha diiwaangelinta gaariga
- Gaanaxa iyo tas-hiilaadka golayaasha.

## **Maxaa lagu darayaa dacwadaada – qodobada muhiimka ah qaarkood haddii aad na soo wacayso ama telefoon noo soo dirayso**

### **Ku adkayso xaqiiqooyinka waaweyn**

- Maxaa dhacay?
- Yaa ka qaybgalay?

### **Ku qor erayadaada**

- Maxay ahayd taariikhda iyo waqtigu?
- Wax markhaanti ahi ma joogay?
- Sawira ma haysaa?
- Dukuminti ma haysaa?
- Ma dhaawacantay?

### **Ku qor afkaad rabto**

Waa la tarjumi doona warqadaada. Haddii ay kugu adag tahay iin ama dhibaato luqadeed awgeed, waad na soo wici kartaa.

Waanu kuu caawimi doonaa si allaale iyo sidii suurtagal ah.

## **Nagala soo xiriir**

Waxaad naga soo wici kartaa khadka TIS (Adeega Afcelinta iyo Tarjumida Qoraalka telefoon **131 450**).

Waad na soo wici kartaa si aad dacwo u samayso, noo weydiiso su'aal kasta oo laga yaabo inaad qabto ama aad talo ugu hesho dacwada Ombudsman-ka.

Cinwaanku waa:

The Ombudsman Victoria  
Level 3, 459 Collins Street  
Melbourne VIC 3000

Telefoon: 9613 6222

Lacag la'aan: 1800 806 314

Telephone typewriter (TTY): 9613 6229

Fakis: 9614 0246

E-mail: [ombudvic@ombudsman.vic.gov.au](mailto:ombudvic@ombudsman.vic.gov.au)

Websaytka: [www.ombudsman.vic.gov.au](http://www.ombudsman.vic.gov.au)

## **Xasuuso xuquuqdaada**

- Waxaad xaq u leedahay adeeg wanaagsan
- Waxaad xaq u leedahay inaad dacwooto.